



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
MINISTRY OF AGRICULTURE & IRRIGATION

REF: WBW/XW/ 0017 /2020

Date: 17/04/2020

WAR-SAXAAFADEED

DIGIIN BOOB DHUL-DAN GUUD

**Wasaaradda Beeraha & Waraabka JFS** waxay ugu horeeyntii ku wargalineysaa, islamarkaana uga digeysaa Bulshada ku nool Degmada Balcad, Gobolka Shabeelaha Dhexe in ay ka fogaadaan boobka Hantida Dhulalkii Danta-Guud ee **Xarumihii ADCda** iyo **Fidinta Beeraha** ee kuwada yaala Degmadaas Balcad.

Wasaaradda waxay la socodsiineysaa, islamarkaana ay bogaadineysaa Guddiga Badbaadinta Hantida Qaranka JFS talaabooyinkii adkaa ee uu arrimahan oo kale horey uga qaaday, asagoo fulinaya masuuliyada-Qaran ee lagu hawlgaliyey ee **XEER-Raiisul Wasaare**,(Ref: **XRW/0.103/01/2019**, 09/01/2019)

Wasaaradda waxay kaloo arrintan ku wargalineysaa **Xafiiska Garyaqaanka Guud ee dawlada JFS** kaasoo **Warqad Habraac** ee Tixraaciisuyahay **Summad:XGG/0158/2019** uu si xoogan uga digay Masuuliyiinta dawlada ee heer federaalba iyo Heer Maamul goboleedba iyo D/Goboleedyada iyo Gudomiyaasha Gobolada dalka, iwm – in marnaba aysan Hatida Qaranka u adeegsan siyaabo baal-marsan Sharciga dalka iyadoo la tixraacayo **XEER Lr.18**, ee 29/01/1976 iyo **XEER-Raiisul Wasaare JFS Lr.47** ee dhaqan-galay 06/12/2018 iyo **Sharci Lr.22** ee ka horeeyey oo asagana dhaqan-galay 09/0/2016)

Hadaba **Wasaaradda Beeraha & Waraabka JFS** ayadoo ka duuleysa qodobada sare ku xusan – ayaa waxay maanta oo ay taariikhdu tahay 1704/2020 waxay cod-dheer ugu sheegaysaa Shaqsiyaadka gacmaha kula jira boobka Dhulka Danta-guud ee **Xarumihii ADCda** iyo **Fidinta Beeraha** ee kuwada yaala Degmada Balcad, oo masuuliyadoodu ay hoos yimaadaan Wasaaradda Beeraha inay ka waantoobaan arinkaas.

**Fiiro gaar ah:** Dhamaan cid walba oo ku lugleh arinta kor kuxusan, waxay Wasaaradda uga digeysaa in aan wax hanti aan la iska gelin dhulalkaas danta guud ah iyadoo sharciyada kor ku xusan ay qaban doonan cid walba oo sifo sharciga ka baxsan iskugu dayda inay hanti iska galiso ama ula wareegto

..... DHAMAAAD.....

Ministry of Agriculture and Irrigation

Mogadishu, Somalia

E-mail: [minister@moa.gov.so](mailto:minister@moa.gov.so)

Tel: +252(0)611-111044

